

# Waqtiga dhaqaaleys!

Internet-ka Ka Hel  
Dheefaha Dadweynaha

# Akoonka Dheefta Macmiilka

4

## Hawlgeli Akoonkeyga Dheefta Macmiilka (CBA)

- Eeg email-kaaga Xaqijinta.
- Booqo [www.WashingtonConnection.org](http://www.WashingtonConnection.org).
- Dhagsii badhanka **Gal Akoonkaaga (Access Your Account)** ee ku yaalla tab-ka **Gal/Login** si aad u gasho Akoonkaaga Washington Connection.
- Marka aad tagto Bogga Hore ee Washington Connection, ku dul-wareego tab-ka **Akoonkeyga/My Account** ka-dibna dhagsii badhanka **CBA-keyga/My CBA**.
- Isticmaal koodhka xaqijinta ee email-ka lagu bixiyey, Aqoonsigaaga Macmiilka ee DHS, iyo summadda degaanka ee xulashooyinka la bixiyey.
- Dhagsii badhanka **Ku-xiga/Next**.
- Marka aad ku hesho farriinta **Hawlgelinta Akoonka** Washington Connection, dhagsii link-iga **Ka-bax/Log out** ee ku yaalla geeska midig ee kore.

5

## Gelidda Akoonkeyga Dheefta Macmiilka (CBA)

- Dhagsii badhanka **Gal Akoonkaaga (Access Your Account)** ee ku yaalla tab-ka **Gal/Login** si aad u gasho Akoonkaaga Washington Connection.
- Geli aqoonsiga adeegsadaha iyo erey-sireedka.
- Dhagsii **Gudbi/Submit**.
- Marka aad tagto Bogga Hore ee Washington Connection, dhagsii badhanka **CBA-keyga/My CBA** ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco **Akoonkeyga/My Account**.
- Akhri **Ogeysiiska Akoonka Dheefta Macmiilka**, ka-dibna dhagsii **Aqbal/Accept** si aad u eegto xogta aasaasiga ah ee ku saabsan kiiskaaga.

Waxaad ka geli kartaa akoonkaaga dheefaha macmiilka mareegtadan bilaashka iyo ammaanka ah 24/7.

**Macluumaadka Muhiimka ah ee aad u baahan karto si aad u sameyso oo aad u hawlgeliso CBA-gaaga** (keliya loogu talagalay isticmaalkaaga shakhsiyeed).

Aqoonsiga Adeegsadaha \_\_\_\_\_

Koodhka Xaqijinta \_\_\_\_\_

Lambarka Aqoonsiga Macmiilka \_\_\_\_\_

Summada Degaanka \_\_\_\_\_

Koodhka Hawlgelinta \_\_\_\_\_

Kale \_\_\_\_\_

### DHIB KALA KULANTO?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah bartaa Washington Connection tab-ka **Ku Saabsan Bartan** hoosta Akoonkeyga/My Account.



### Waa kuwan sababta – helidda 24/7 ee:

- Dheefaha hadda
- Taariikhda dheefta
- Dokumentiyada la soo gudbiyey
- Taariikhaha muhiimka ah
- Xiriirka/Link-iga ProviderOne
- Xiriirka/Link-iga helidda baaqiga kaarka EBT iyo codsiyada beddelka
- Dib-u-eegista Shahaaddada-Dhexe ee Horey Loo Buuxiyey





Iskaan-garee koodhka QR ama booqo  
WashingtonConnection.org si aad u codsato  
Cunto, Kaash, Kabka Daryeelka Carruurta,  
Classic Medicaid iyo kuwa kale oo badan.

## Ma dooneysaa in aad waqtigaaga dhaqaaleysato?

Kuwan waa tallaabo ee  
loo maro hab degdeg ah, fudud,  
oo amaan ah oo lagu heli karo  
macluumaadka akoonkaaga  
dheefta DSHS.

Ka hor inta aadan bilaabin,  
waxaad u baahan doontaa:

- In aad internet haysato
- Akoon Email
- Lambarka Aqoonsiga Macmiilka ee DSHS
- In aad taqaanno summada Degaankaaga
- Magacaaga sida uu ugu muuqdo  
diwaannada DSHS
- Dheefaha DSHS:
  - Kiis firfircoon ama hawl suge ah
  - La xiray ama la diiday 60-kii maalmood  
ee la soo dhaafay

\*Haddii aad durba haysato akoonka Washington Connection SAW oo hawlgaley, u gudub tallaabada 3aad.

### 1 Samee Akoonka Washington Connection

- Booqo [www.WashingtonConnection.org](http://www.WashingtonConnection.org).
- Dhagsii badhanka **Samee Akoon Cusub/Create New Account** ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco ee Samee Akoon/Create Account.
- Buuxi dhammaan goobaha xogta ee ku yaalla bogga **Samee Akoonka Adeegsadaha Cusub**.
- Dhagsii badhanka **Ku-xiga/Next**.
- Email-kaaga ka eeg koodhka xaqijintaa\*.

\* Haddii aadan helin email-ka xaqijinta, eeg galakaaga junk/spam. Haddii aadan isticmaaleynin telefoon casri ah, waxaad u baahan doontaa in aad mareegtada xirto ka hor inta aadan hawlgelin akoonkaaga.

### 2 Hawlgeli Akoonkeyga Washington Connection

- Marka aad tagto email-ka xaqijinta, dhagsii linkiga labaad ee la bixiyey si aad u hawlgeliso Akoonkaaga.
- Shaashadda **Xaqijinta – Adeegsadaha Cusub** ayaa soo muuqaneysa.
- Dhagsii link-iga **Gal/Login**.

#### - AMA -

- Marka aad tagto Bogga Hore ee Washington Connection, ku dul-wareego tab-ka **Samee Akoonka/Create Account** ka-dibna dhagsii badhanka **Hawlgeli Akoonkaaga/Activate Your Account**.
- Geli **Aqoonsigaaga Adeegsadaha** iyo **Koodhkaaga Xaqijinta** ee loo soo direy email-kaaga.
- Dhagsii badhanka **Ku-xiga/Next**.
- Dhagsii link-iga **Gal/Login**.
- Geli Aqoonsigaaga Adeegsadaha, Erey-sireedkaaga ka-dibna dhagsii **Gudbi/Submit**.

Mareegtada Washington Connection waxaa  
lagu heli karaa Af-Ingiiriis iyo Af-Isbaanish.

Hadda oo Akoonkaaga Washington Connection uu hawlgaley, waxaad diyaar u tahay in aad sameyso Akoonkaaga Dheefta Macmiilka.

### 3 Samee Akoonkeyga Dheefta Macmiilka (CBA)

- Dhagsii badhanka **Gal Akoonkaaga (Access Your Account)** ee ku yaalla halka hoos iyo kor loogu dhaadhaco ee **Gal/Login** si aad u gasho Akoonkaaga Washington Connection, ama
- Dhagsii badhanka **CBA-keyga/My CBA** ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco **Akoonkeyga/My Account**.
- Marka aad tagto bogga Warbixinta Kooban, dhagsii linkiga **Hel Macluumaadka Akoonka Dheefta Macmiilka**.
- U buuxi dhammaan goobaha xogta ee bogga Diiwaangelinta sida saxda ee ay ugu jiraan galka DSHS adiga oo adeegsanaya summada degaankaaga.
- Dhagsii badhanka **Ku-xiga/Next**.
- Ka eeg email-kaaga macluumaadka ku saabsan tallaabada xigta si aad u hawlgeliso Akoonkaaga Dheefta Macmiilka (CBA).
- Dhagsii badhanka **Ka-bax/Log out** ee ku yaalla meesha xigta magacaaga.

Sii socota...